

Kalasoocida waxaa lagu mamnuucay XEERKA VI

Waxaa jira qaabab badan oo si sharci darro ah wax loogu kala sooco ama loogu kala saaro kuwaasoo kusaleysan jinsiyadda, midabka ama meesha qofku kasoo jeedo asal ahaan kuwaasoo xadida fursadaha eey heli karaan dadka laga tirada badanyahay si eey u helaan adeegyada iyo baraamijyada ey helaan kuwada dhigoodaahi.

Iyo wax yaabo kale oo lamida si looga shaqeysiiyo baraamijyada ey caawineyso dowladda dhexe, **kafaa'iideystayaashu si toos ah iyo si dadban toona:**

► **Uma dafiri/inkiri/beenin karaan baraajimyadii adeegii, gargaarkii loo fidiyey faa'iidooyinkiisii.**

► **Sii adeegyo kala duwan, gargaar ama faa'iidooyin ama u sii iyaga si kaduwan kana hagaagsan sida eey iyagu siiyaan kuwa kale, ama**

► **Si gooni ah ula macaamil oo ula dhaqan shaqsiyaadkaas si kastoo ay tahayba taa soo laxariirta ka faa'iideystayaasha adeeg kasta, gargaar kasta ama faa'iido kasta.**



BARNAAMIJ XEERKA VI

Sida loo aruuriyo cabashooyinka:

Qeybaha bulshada kuwaasoo loo arko iney yihiin hormuudka faquuqidda ama kala saaridda ayaa si gooni ah loo aruurinayaa, qoridda cabashooyinka ilaa 180 maalmood laga bilaabo maalintii ugu horeysay ee ay soo shaax baxday faquuqida ama kala saar saariddu.

Qaababka cabashooyinka iyo tilmaamahooda waxaad ka heli kareysaa markasta (online) gpmetrobus.com ama booqo METRO Transit Center, 21 Elm Street ama xafiiska weyn office ku yaala 114 Valley Street ee Portland. Foomamka waxaa sidoo kale laguugu soo diri karaa boostada markaad codsato. Foomka Cabashadu XEERKA VI ee METRO waxaa lagugu weydiindoonaa ama lagaaga rabi doonaa inaad buuxiso xogta soo socota:

- Magaca, ciwaanka taleefan numberka
- Taariikhda iyo meesha dhacdadu kadhacday
- Dhacdadii oo sifiican u faahfaahsan
- Aqoonsiyada marqaatiyaasha

Cabashooyinka waa in lasaxiixaa, la taariikheeyaa laguna soo diraa ama lakeenaa:

**Greater Portland Transit District
METRO
114 Valley Street
Portland, ME 04102**

GREATER PORTLAND
metro
207.774.0351 gpmetro.org



METRO Transit Center

Elm Street ee Portland,
Ka soo horjeeda Portland Library,
hal isgoys ujira Congress Street.

**BARNAAMIJ XEERKA VI
EE XUQUUQDA MADANIGA 1964**

7/27/16 (SOMALI)

Xuquuqdaada Hoos Timaada Xeerka VI ee Xuquuqda Madaniga ee 1964:



“Qof majiro kunool America kaasoo lagu faquuqay jinsi ahaantiisa, midabkiisa ama asal ahaan meesha uu kasoo jeedo oo laga saaraayo kaqeyb qaadashada, inkiridda faa'iidooyinka ama hormuudnimada kala soocidda ee baraaajmkasta ama wax qabad kasta kaasoo looga helaayo dowladda dhexe kaalmo dhaqaale.”

Haddii aad dareento in lagu takooray ama lagaa saaray dadka intiisa kale takooridaasi waxeey noqon kartaa in jinsi ahaan, midab ahaan ama asal ahaanba meesha aad kasoo jeedo waxaad gal dacwadeedkaaga kusoo hagaajin kartaa Greater Portland transit District METRO.

Fiiri macluumaadka kusaabsan hanaankan ama habkan boga gadaale ee qormada.



"Cadaalad ahaan waa in dhammaan hantida dadweynaha, taa so ah canshuurta ay bixiyeen dhammaan jinsiyadaha kale duwan, in aan lagu bixin qaab dhiiri gilinaas ama keeni karta takoorka isirka."

President John F. Kennedy

Kulug Lahaanshaha Dadweynaha

Kulug lahaanshaha dadweynuhu waxeey aad muhiim ugu tahay qeybha soo socda. Gaadiidka, qorsheynta iyo hormarinta mashaariicda METRO waxey isticmashaa habab kala duwan si eey isugu keento argtida dadweynaha taasoo kusaabsan adeegii loo qabtay, heerarka iyo mashaariicdii tasoo ay kujiraan:

- Kulamada Madaxda iyo Gudiyada
- Kulamada sanadlaha ah ee shacabka
- Aqoon isweydaarisga bulshada loo sameeyo
- Qeybinta howlaha si loo hormariyo dadaalada gaarka ah
- Qeybaha Habka tooska looga faaloodo

Si aad uhesho xog intaas ka dheeri ah:

- gpmetro.org / 207-774-0351
- Email: info@gpmetro.org
- Visit - 114 Valley St., Portland, ME

Qofka Ingiriiskiisa xadidan yahay (LEP)

Dawladda federaalka iyo hay'adaha kale eek a hela gargaar dawladda federaalka waa in ay qaadaan tallaabooyin macquul ah si loo hubiyo in dadka LEP ay helaan barnaamijyada, adeegyada iyo macluumaadka.

Yaa waye qofka Ingiriiskiisa xadidan

yahay? Dadka aan afkooda koowaad ahayn luqadda af Ingiriisiga, qofkaa soo leh aqoon xadidan oo ay ku akhrin karaan, hadali karaan ama ku fahmi karin luqadda Ingiriisiga ayaa ah Qofka leh aqoon xadidan haga af Ingiriisiga "LEP." Shaqsiyaadkani waxaa laga yaabaa in ay xaq u leeyahiin kaalmo haga afka ayadoo la eegayo nooca adeegga, faa'iido ama arin la soo gudbonatay. METRO waxay isticmaashaa adeeg dhinac saddexaad ee turjubaanada ku salaysan yeerista telefoonka si doo kale waxay bixiyaan turjubaano xiliga shirarka dadweynaha hadii aad codsato aan ogeysiis hormaris ah bixisid.